



Ma rabtaa in aad wax ka dhigto PPS? Waa kuwan sida loo bilaabi lahaa

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay qiimeynta musharaxa ka sameyn doonaan Carwada Macallinka Xirfadda leh ee Oregon. Waxyaabaha gaarka ah:

Maxay: Shaqaalaha PPS kula kulan Carwada Macallinka Xirfadda leh ee Oregon (OPEF)

Goorta: Talaadada, Abriil 3, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 3 galabnimo.

Goobta: Oregon Convention Center, 777 N.E. Martin Luther King Jr. Blvd.

Dhacdadu waxay fursad siin doontaa musharaxiinta sidii ay ugu soo biiri lahaayeen kooxdayada isla markaana ugu shaqeyn lahaayeen dugsiiga degmada ee ardayda kala duwan ee ugu ballaaran isla markaana ugu badani dhigtaan. Musharixiinta waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay daawadaan [fiidayaha shaqo qorista ee degmada](#), ka dibna ka buuxiyaan [foomkayaga internet-ka ee wax daneynta](#) muddo aan ka dambeyn Talaadada, Maarso 20, si loo tixgeliyo.

Buuxinta foomku waxay Dugsiyada Dadweynaha Portland u oggolaaneysaa in ay dib u eegaan waayo-aragnimadaada iyo warqadaada shaqada 'resume'. Waaxda Kheyraadka Dadweynaha ayaa kula soo xiriiri doonta ka hor dhacdada haddii lagu xushay qiimeynta musharaxa ee soconaysa 20 daqiiqo ee maamulaha degmada uu wax badan ka baran doono adiga iyo daneynta aad daneynayso PPS.

Marka lagu daro buuxinta foomka ee internet-ka, warqadaada shaqada 'resume' oo ah nooca 'Word document' ama PDF email ahaan ugu sii dir hrform@pps.net. Magacaaga soo raaci cinwaanka dokumentiga.